



XAFIISKA
HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WARBIXINTA BAARISTA WAXQABADKA EE MASHRUUCA KA SOO KABASHADA XASARADAHA SOOMAALIYA

August 2024

TUSMADA

GOGOLDHIG	i
EREYADA LA SOO GAABIYAY	iii
DULMAR KOOBAN	iv
CUTUBKA 1 — HORDHAC	1
1.1. Sooyaalka	1
1.2. Sababta Dhiirrigelisay fulinta Baarista	2
CUTUBKA 2 — NAQSHADEYNTA IYO HABRAACA BAARISTA	5
2.1. Ujeeddada Baarista	5
2.2. Su'aalaha Baarista, Halbeegyada Qiimeynta, iyo Ilaha Xogta	5
2.3. Baaxadda iyo Xadiddaadda Baarista	6
2.4. Hababka Xog Ururinta	6
2.5. Heerarka Baarista	7
CHAPTER 3 — FAAHFAAHINTA MAJAALKA BAARISTA	8
3.1. Baahida loo Qabo Kaabayaal Xooggan oo lagu Maareeyo Khataraha Fatahaadaha	8
3.2. Hannaanka Sharciga	8
3.3. Maalgelinta	8
3.4. Dowlada iyo Mas'uuliyadaha Hay'adaha Muhiimka ah ee ku lug leh Mashruuca	10
3.5. Faahfaahinta Geeddi-Socodka Hawlaha	12
CUTUBKA 4 — NATIISOYINKA, GUNAANADKA, IYO TALOOYINKA	13
4.1. Daldaloollo ka jira Dayactirka Jiinka Webiga	13
4.2. Darbiyada oo aan lahayn biya mareeno	16
4.3. Tayada Hawlaha Shaqo oo Hooseysa	17
4.4. Dib u Dhaca Dayactirka Jiinka Webiga	20
LIFAAQYO	22
Lifaaq 1	22
Lifaaq II	23
Lifaaq III	24
Lifaaq IV	25



Federal Republic of Somalia
Office of the Auditor General of FRS

Tixraac.: XHG/HG-540/2024

Tr: 30/08/2024

Guddoomiyaha Golaha Shacabka, BFS
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, BFS
Muqdisho, Somaaliya

**WARBIXINTA BAARISTA WAXQABADKA EE MASHRUUCA KA SOO KABASHADA
XASARADHA SOOMAALIYA- (SOMALIA CRISIS RECOVERY PROJECT- SCRIP)**

Mudane Guddoomiye,

Waxa aan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbiyo Warbixinta Baarista Waxqabadka ee mashruuca ka soo kabashada Xasaradaha Soomaaliya, taas oo uu diyaariyay Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (XHGS) kuna saabsan sannad maaliyadeedka 2020 ilaa 2023, Warbixintan ayaa noqonaysa baaristii waxqabad (Performance Audit) ee ugu horreysay ee uu soo saaray Xafiiska Hantidhowrka Guud JFS.

Baaristan waxqabadka ayaa diiradda saartay hubinta in Unugga Fulinta Mashruuca (PIU) ee hoos taga Wasaaradda Maaliyaddu uu u fuliyay hawlaha dib u haybeynta Jiinka Webiyada ee degmooyinka ay fatahaaduhu saameeyeen ee dowlad-goboleedyada Hirshabeelle, Koonfur-galbeed, iyo Jubbaland si waafaqsan mabaadi'da udub-dhaxaadka u ah Baarista Waxqabadka ee kala ah:- Hufnaanta, Wax-ku-oolnimada iyo Dhaqaalaha (3Es – Economy, Efficiency and Effectiveness), Baaistan Waxqabadku waxa ay ku xaddidan tahay (Audit scope) Baarista iyo ka warbixinta diiwaannada maaliyadeed iyo waxqabadyada afartii sannad maaliyadeed ee u dhexeysay 2020 illaa 2023.

Si waafaqsan Cutubka 3, Qodobka 5 (17) ee Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Sharci. Lr. 14, 10-ka Sebteembar 2023) iyo Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee baarista Waxqabadka (ISSAI 3000). Si loo waafaqo halbeegan caalimiga ah, waa in baarista loo qorsheeyaaa loona hirgeliyaa si loo helo cadeymo dhammaystiran oo ku habboon, kuwaas oo saldhig maangal ah u noqon kara natiijooyinka aan helnay iyo gunaanyada aan gaarnay iyada oo la fiirinayo u jeeddooyinka barista.

Waxaan jecelahay inaan u mahadceliyo hawl-wadeennada xafiiskayga ee qabtay baaristan. Waxaan sidoo kale uga mahadcelinayaa hawl-wadeennada Unugga Hirgelinta Mashruuca KSXS ee Wasaaradda Maaliyadda wada shaqaynta iyo taageerada ay siiyeen xafiiskayga intii lagu guda jiray muddada baarista.

Avv: Axmed Ciise Guutaale
Hantidhowrka Guud, JFS.

30th August 2024



EREYADA LA SOO GAABIYAY

QBSHG	Qorshaha Baarista Sanadlaha ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud
UBR	Ururada Bulshada Rayidka
QBSA	Qiimeynta Baahida Saamaynta Abaarta
HCB	Hay'adda Cuntada iyo Beeraha
DFS	Dowladda Federaalka Soomaaliya
QBSF	Qiimeynta Baahiyaha Saamaynta Fatahaadda
DXDF	Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka
DBG	Dadka ku Barakacay Gudaha
WW&W	Wasaaradaha, Waaxyaha & Wakaaladaha
WM	Wasaaradda Maaliyadda
WQMHD	Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha
QHQ	Qorshaha Horumarinta Qaranka
HQN	Hay'adda Qaxootiga ee Norway- NRC
XHGS	Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Soomaaliya
DQM	Dokumentiga Qiimeeynta Mashruuca
UHM	Unugga Hirgelinta Mashruuca
HHM	Hagaha Hawlaha Mashruuca
HD&A	Hannaanka Dib-u-soo-kabashada iyo Adkeysiga
SCRP / MKXS	Mashruuca Ka Soo Kabashada Xasaradaha Soomaaliya
KMHG	Kooxaha Mashruuca ee Heer Gobol
QM	Qaramada Midoobay
XQMAM	Xafiiska Qaramada Midoobay ee Adeegyada Mashaariicda

DULMAR KOOBAN

Fatahaadaha Soomaaliya ka dhaca waa masiibo soo noqnoqota oo waxyeelleysa deegaanka iyo dadkaba, Daadadku waxa ay yimaaddaan marka ay biyuhu buux dhaafiyaan gidaarada Webiga ee Webiyada islamarkaana ay biya dhigaan dhulka qallalan ee ku dhow, dhul-beereedka iyo deegaanada ku dhow Webiyada kuwaas oo leh cimilo oomane ah iyo roobab aan la saadaalin karin, taasina waxa ay si gaar ah ugu nugeleysaa fatahaadaha. Nidaamyada deegaanka ee nugul ee dalka, oo ay weheliyaan kaabayaashii dhaqaale oo liita ayaa uga sii daraya saameynta fatahaadaha, taas oo horseedda khasaare nafeed, burbur hantiyeed, iyo barakaca bulshada Soomaaliyeed ee ku nool magaalooyinka iyo deegaanada Webiyada.

Maareeynta iyo la tacaalidda daadadka si waxtar leh ayaa muhiim u ah horumarinta adkeysiga bulshada, Daadadka soo noq-noqda ayaa Soomaaliya ka geysta khasaare baaxad leh iyo dhimasho, Sidaa darteed, Mashruuca ka Soo Kabashada Xasaradaha Soomaaliya (MKXS), oo ay ku kacayso lacag dhan US\$187.5 milyan oo uu maalgeliyey Bankiga Adduunka ayaa la billaabay, Mashruucan waxaa fulinaya Unugga Hirgelinta Mashruuca (UHM) oo hoos yimaada Wasaaradda Maaliyadda (WM), iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha (WQMHD), iyo wasaaradaha ay khusaysa ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed.

Ujeeddada Mashruucan ayaa ahaa in lagu taageero soo kabashada hab-nololeedka iyo dib u habeynta kaabayaasha maaraynta khatarta fatahaadda oo ay kamid tahay hirgelinta tallaabooyinka yaraynta khatarta fatahaadda sida ilaalinta Jiinka Webiyada, dhireynta Jiinka Webiyada dayactirka iyo sare u qaaddida darafyada Webiyada, iyo dib u soo celinta biyo-mareennada muhiimka u ah biyaha iyo daadadka Roobka.

Inkasta oo mashruuca la hirgeliyay, haddana Warbixintan Baarista Waxqabadka ee Mashruuca ka soo kabashada Xasaradaha ee Soomaaliya waxa ay iftiimineysaa saamaynta joogtada ah ee fatahaadaha Webiyada Shabeelle iyo Jubba, gaar ahaan magaalooyinka Beledweyn, Jowhar, iyo Afgooye.

Dowladda Soomaaliya ayaa codsatay islamarkaana qaadday ololeyaal kaladuwan oo ku wajahan wax-kaqabashada khasaaraha sii kordhaya ee ka dhashay fatahaadda Webiyada Jubba iyo Shabeelle, dadaalladaas wax looga qabanayo dhibaataada Fataahadda waxa kamid ah meelmarinta Sharciga Hantidhowrka JFS oo xeeriyey hirgelinta Baarista Waxqabadka Mashaariicda iyo Barnaamijyada kaladuwan ee deeqda iyo sidoo kale Waxqabadka hay'adaha dowladda Soomaaliya.

Tallaabadaasi waxa ay ku Waajibisay Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Qaranka Soomaaliya in uu sameeyo baaris waxqabad oo tijaabo ah si loo qiimeeyo waxtarka kaabayaasha maareynta khatarta fatahaadaha ee degmooyinka ay dhibaataadu saameysey, Baaristan waxaa diiradda lagu saaray hubinta waxtarka dayactirka iyo kaabayaasha celiya fatahaadaha ee uu Unugga Fulinta Mashuucu ka fuliyay degmooyinka fatahaaduhu saameeyeen intii u dhaxaysay 2020 iyo 2023.

Natiijooyinka muhiimka ah ee baarista waxaa ka mid ah:

1. Taag-darro iyo dal-daloollo ka jira gidaarada 9 ka mid ah 24ka goobood ee la baaray taas oo wax u dhimaysa hannaanka difaaca daadadka iyo fatahaadda.
2. Qorshayn liidatay oo horseedday maqnaanshaha hababka biyo-mareenka muhiimka ah, taas oo hoos u dhigtay waxtarka tallaabooyinka yaraynta khatarta fatahaadda;
3. Hawlo dhismo oo ka hooseeya heerkii loo baahnaa, saameyna ku yeeshay natiijada mashruuca;

4. Dib u dhac ku yimid fulinta mashruuca, taas oo caqabad ku noqotay in bulshada iyo deegaankaba laga difaaco daadadka waqtigii loo baahnaa.

Baarista waxaa lagu soo gunaanaday in ay jirtay qorshe xumo iyo bulshada oo aan si wax ku ool ah looga tala gelin, iyo sidoo kale Qandaraaslayaasha oo aan si wanaagsan loo kormeerin, taasina waxay keentay gaabis iyo tayada dhismaha oo liidata, ugu dambayntiina xaddiday awoodda difaaca iyo u adekysiga daadadka ee Jiinka Webiyada ee la dayactiray.

Baaristan Mashruuca ka soo kabashada Xasaradaha ee Soomaaliya waxa ay fareysaa Unugga Hirgelinta Mashruuca in uu wax ka qabto daldaloolada ka jira derbiyada Webiyada, sidoo kalena uu tixgeliyo islamarkaana uu si wax ku ool ah u qorsheeyo hannaanka dhismaha biya mareenada waqtiga la qorsheynayo dhismayaasha si looga hortago in dhul-beereedku isu beddelo biyo-fadhiisi, Intaa waxaa dheer, baahida degdegga ahh ee hubinta iyo xaqiiqinta tayada dhismayaasha iyo dayactirka derbiyada webiga iyada oo lagu dhameystirayo waqtiga ku habboon iyo sida lagu heshiiyay, taas oo ay tahay in Unugga fulinta Mashruucu u yeesho fiiro gaar ah.

CUTUBKA 1 — HORDHAC

1.1. Sooyaalka

Mashruuca Ka soo kabashada Xasaradaha ee Soomaaliya waa ay mashruuc ujeeddadiisu tahay ka gacan-siinta dadaallada hortagga iyo ka soo kabashada Xasaradaha iyo musiibooyinka, kaas oo leh miisaaniyad US **\$187.5 million** (Boqol Siddeetan iyo toba Milyan iyo Shan boqol oo kun oo dollar), Waxaa maalgeliyay Bankiga Adduunka (World Bank) iyada oo la sii marinayo Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Federaalka, fulinta Mashruucan waxaa Wasaaradda Maaliyadda Mas'uul uga ah Unugga Fulinta Mashruuca, (PIU) oo hoos yimaada Wasaaradda Maaliyadda, iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Qorsheeynta Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

Mashruucu waxa uu bilaabmay sanadka 2020 waxana lagu wadaa in uu socdo mudo shan sano ah ilaa 2025, waxa kale oo kamid ah Ujeeddooyinka Mashruucan wax ka qabashada baahiyaha soo kabashada iyo adkeysiga ee lagu ogaaday intii lagu jiray Qiimeynta Baahiyaha ay Keentay Saamaynta Abaarta (QBSA) iyo Qaab dhismeedka dib u soo kabashada iyo adkeysiga (QDA), Mashruucu waxa uu waafaqsan yahay Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 9aad (QHQ-9), gaar ahaanna Hannaanka Dib-u-soo-kabashada, Adkeysiga Qaranka, caawinta dib u soo kabashada hab-nololeedyada iyo kaabayaasha deegaannada fatahaadaha iyo abaaruhu saameeyeen, iyo kor loo qaadidda awoodda u diyaar-garowga musiibooyinka dalka oo dhan.

Si gaar ah, mashruuca waxa uu higsanayaa in lagu caawiyo in ka badan 300,000 oo Qoys iyo ku dhawaad 160,000 oo Neef oo ku nool in ka badan 40 deegaan oo ay saameeyeen daadadka, Fatahaadda Webiyada, Abaarta, iyo deegaanada uu Ayaxu ku habsaday¹.

2019, Roob mahiigaan ah ayaa sababay fatahaad uu sameeyay Wabiga Shabeelle, kaas taas oo keentay dhimasho iyo burbur soo gaaray kaabayaasha, dalagyada, hantida iyo xoolaha, In ka badan nus milyan qof oo ku kala nool 17 degmo oo ka tirsan 10 gobol oo katirsan JFS ayaa ku waxyeeloobay, Khasaaraha dhaqaale ayaa kor u dhaafay US \$270 Milyan iyada oo ay ugu wacan tahay burbur soo gaaray kaabayaasha muhiimka ah iyo ilaha Nolosh². Bulshooyinka ay saameysay ee ku nool dowlad goboleedyada, iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waxa ay qireen baahida loo qabo hirgelinta waxqabad dhammaystiran oo waqti dheer ah si loo yareeyo khataraha mustaqbalka ee ka imaanaya masiibooyinka cimilada la xiriira.

Si loo hiigsado yoolkan, Mashruuca MKXS waxa uu billaabay iskaashi lagu hormarinayo xeeladaha maalgelinta ee soo kabashada degdegga ah, dib u dhiska, iyo maal-gelin mustaqbalka lagu sameeyo Maareynta Khataraha Musiibooyinka (MKHM), taas oo ay ku jiraan dadaallada u diyaar garowga iyo ka jawaab celinta daadadka oo leh hadafka muddada dheer islana jaan-qaadi kara halkii ay ka ahaan lahayd isku-dayo gooni-gooni ah. Habkani waxa uu tixgalinayaa sida ay isugu xiranyihiin daadadku iyo baahida loo qabo dadaallada isku dubbarridka heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda, iyada oo ay muhiim tahay horumarinta awoodda ka-hortagga musiibada iyo u diyaargarowga ee DXDF si loo dhimo kharashyada ku baxa hawlaha bini'aadannimo ee mustaqbalka, Samaynta habka-hortag oo

¹ Wasaaradda Maaliyadda, Dowladda Federaalka Soomaaliya (2023) <https://mof.gov.so/the-ministry/programs/somalia-crisis-recovery-project>.

² Bankiga Addunka, SCRP –Documentiga Qiimeynta Mashruuca. Laga heli karo <https://rb.gy/cxqas>.

xooggan iyo u-diyaargarowgu waxa ay si weyn u dhimi kartaa dhimashada waxayna sare u qaadi kartaa waxtarka dadaallada horumarineed ee Soomaaliya³.

1.2. Sababta Dhiirrigelisay fulinta Baarista

Fulinta Baaristan Waxqabadka Mashruuca Ka soo kabashada Xasaradaha ee Soomaaliya waxa dhiirrigeliyey muhiimadda ay leedahay Hantidhowrista iyo kawarbiginta Wax ku oolnimada Waxqabadka Mashruucaan SCRIP ee ka jawaabidda saameynta xun ee ka dhalatay fatahaadaha iyo Abaarta, Xoojinta hab-nololeedyada iyo adkeysiga bulshooyinka malaayiinta ah ee fatahaadaha soo noqnoqdaa ay noloshooda saameeyaan sanad kasta.

Warbaahintu waxay si joogta ah u tebisaa waxyeellada iyo dhimashada ka dhalata fatahaadaha gaar ahaan magaalooyinka Beledweyne, Jowhar iyo Afgooye⁴. Intaa waxaa dheer, heerka biyaha webiga ee laga soo sheegay magaalooyinka uu maro webiga Jubba sida Baardheere iyo Luuq ayaa dhaafay qiyaastii la filayay oo fatahay, waxaana uu geystay khasaare nafeed, burbur ku yimid hanti iyo dhul beereed⁵.

Mas'uuliyiinta ugu sarraysa DFS ayaa dhowr mar codsi iyo qaylo-dhaan u diray Beesha Caalamka iyo Deeq Bixiyayaasha in ay gacan ka geystaan sidii wax looga qaban lahaa fatahaadaha soo noqnoqday ee sababa dhimasho iyo burbur ku yimaada ilaha nolosha ee dadka ku nool dhulka ay maraan Wabiyada Jubba iyo Shabeelle.

Bishii Maajo 2018, Ra'iisul Wasaare Ku Xigeenka Soomaaliya ahna Guddoomiyaha Guddiga Qaran ee Gurmada Fatahaadaha ayaa jeediyay baaq ku aaddan in la helo lacag **80 milyan** oo Doollarka Mareykanka ah si gargaar degdeg ah loo gaarsiiyo dadka ay saameeyeen fatahaadaha ee gobollada⁶ bartamaha iyo koonfurta. Bishii Oktoobar 2019, oo ah xilli roobaadkii xigay, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya (BFS) ayaa yeeshay kalfadhiyo uu uga hadlayey ugana doodayey gurmada loo fidinayo dadka ku dhibaateysan gobollada ay fatahaaduhu saameeyeen iyaga oo magacaabay Guddiga Gurmada Fatahaadaha⁷.

Bishii December 2019, hawlgal wadajir ah oo ay sameeyeen Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Bankiga Addunka si ay u qiimeeyaan khasaaraha iyo waxyeellada ay sababeen daadadka iyo in la sameeyo Istaraatiijiyad dib u soo kabasho degdeg ah iyo dhisidda adkeysiga muddada dheer ayaa ku qiyaasay khasaaraha ka dhashay fatahaadda in ka badan **US \$270 Milyan**.⁸

Mashruuca KXS waxaa la bilaabay April 2020, ujeeddadu waxa ay ahayd si kor loogu qaado loona xoojiyo habka ay dawladdu u dhantahay ee dhiirrigelinta iskaashiga iyo adkeynta kalsoonida u dhexeysa muwaadiniinta iyo dowladda iyada oo loo marayo dadaallada ay dawladdu hormuudka u tahay ee looga jawaab-celinayo dhibaatooyinka soo food saaray dalka, oo ay kow ka yihiin Fatahaadaha iyo Sugnaan la'aanta cunnada ee ka dhalatay Abaaraha, kala Qoqobnaanta dadaallada lagula tacaalyo maaraynta musiibada, adkeysiga

³ Nile Post (2018). Retrieved online from <https://nilepost.co.ug/2018/05/21/somali-government-un-appeal-for-80-million-for-flood-victims-following-heaviest-rainfall-in-decades/>

⁴ Nile Post (2018). Retrieved online from <https://nilepost.co.ug/2018/05/21/somali-government-un-appeal-for-80-million-for-flood-victims-following-heaviest-rainfall-in-decades/>

⁵ Nile Post (2018). Retrieved online from <https://nilepost.co.ug/2018/05/21/somali-government-un-appeal-for-80-million-for-flood-victims-following-heaviest-rainfall-in-decades/>

⁶ Nile Post (2018). Retrieved online from <https://nilepost.co.ug/2018/05/21/somali-government-un-appeal-for-80-million-for-flood-victims-following-heaviest-rainfall-in-decades/>

⁷ Nile Post (2018). Retrieved online from <https://nilepost.co.ug/2018/05/21/somali-government-un-appeal-for-80-million-for-flood-victims-following-heaviest-rainfall-in-decades/>

⁸ The World Bank, SCRIP - Project Appraisal Document. Available online at <https://rb.gy/cxqas>

dhaqaalaha, waxaana si ujeeddadaas loo fuliyo la garwaaqsaday in maqnaanshaha bulshada ee ka qaybgalka dadaaladaasi ay wiiqi karto in loo shaqeeyo hab wadajir ah ayna horseedi karto caqabado mustaqbalka fog.

Sidaa darteed, mashruucan oo yimid waqtigii loo baahnaa waa mid muhiim ah, isaga oo dhidibada u aasaya nidaamka mustaqbalka ee maaraynta iyo yaraynta khataraha musiibooyinka, Intaa waxaa dheer, sooyaal ahaan Soomaaliya waxa ay waaya-arag u tahay dadaallo bini'aadannimo oo meerto ah ku dhisan aragti gaaban iyada oo aan xalalka waara iyo kaabayaasha aasaasiga ah aysan kamid ahayn maalgelinta dadaalladaas bani'aadannimo.

Natiijada laga dhaxli karo tallaabooyinka ku dhisan aragtida muddada dheer waxaa ka mid ah in hawlaha la hirgeliyay waxtarkoodu waaro, guulaha laga dhaxlayo ayaa noqonaya in aan la hirgelin mashaariic is-bar-bar yaacaya, iyo hirgelinta xalal waxtar leh oo qiimo jaban oo badbaadinaya nafta iyo hab-nololeedyada.⁹

Mashruuca KXS, oo loo qoondeeyay miisaaniyad dhan US **\$187.5 milyan**, ayaa kharash gareeyay in ka badan US **\$95 Milyan** sannad maaliyadeedka 2022 iyo 2023, Mashruucu waxa uu lacag dhan US **\$12.6** (Toban iyo Laba Milyan iyo Lix boqol oo kun oo dollar) si gaar ah ugu qoondeeyay in wax looga qabto dayactirka Nidaamka xakamaynta Fatahaadaha Webiyada ee jabay ama aan shaqaynayn¹⁰. Si kastaba ha ahaatee, Xogta Maamulka Macluumaadka Biyaha iyo Dhulka Soomaaliya ee Hay'adda Cuntada iyo Beeraha (FAO – SWALIM) ayaa tilmaamaysa in dhibaatooyinka daadadka la xiriira ay weli jiraan, oo aan waxba laga qaban daldaloolada jira ee kaabayaasha xakamaynta fatahaadaha.¹¹

Inkasta oo la hirgeliyay dadaallada mashruucan, haddana fatahaadda webiga Shabeelle waxa ay ku dhufatay magaalada Beledweyne 8-dii Maajo, 2023, taas oo sababtay burbur baahsan oo soo gaaray beero, kaabayaasha bulshada, iyo hanti kale.¹² Bishii Maarso 2023, fatahaado ka dhacay degmada Baardheere ee gobolka Gedo, ayaa kumannaan qof ku barakaceen, burburiyeen hanti, isla markaana waxa ay abuureen baahiyo daran oo isugu jira hoyga, caafimaadka, biyaha, nadaafadda iyo agabka aan cuntada ahayn¹³. Sidaa darteed, maamulada deegaanada ay fatahaaduhu saameeyeen ayaa walaac ka muujiyay waxtarka mashaariicda yaraynta khatarta fatahaadda kuwaas oo keliya maareeya xaaladaha degdegga ah, taasina waxa ay muujisay baahida gobolada ay webiyadu maraan ay u qabana hirgelinta xalal wax ku ool ah ka hor inta aysan xaaladaha degdegga dhicin.¹⁴ Intaa waxaa dheer, warbixinta maaliyadeed ee sanadka 2022 ee Xafiiska Hantidhowrka waxa ay iftiimisay khaladaad la xiriira qoondaynta lacagaha ee ka jiray mashruuca MKXS iyo mashaariicda kale ee la midka ah.

Iyada oo qayb ka ah Qorshaha Hantidhowrka 2023 ee Xafiiska Hantidhowrka Guud lana tixgelinayo sababaha kor ku xusan iyo saameynta xun ee ka dhashay khatarta fatahaadda, XHG waxa uu go'aansaday in uu baaris waxqabad ku sameeyo mashruuca KXS si uu u qiimeeyo in tallaabooyinka maaraynta khatarta fatahaadda ee ilaa hadda uu fuliyay Unugga

⁹ Ibid.

¹⁰ FGS Financial Statements, Supporting Schedule FY 2022

¹¹ <http://frrims.faoswalim.org/rivers/breakages>

¹² ReliefWeb Portal (2023). Retrieved online from <https://reliefweb.int/report/somalia/actionaid-press-release-beledweyne-flooding-response-19th-july-2023>.

¹³ UN FAO's SWALIM database (2023). Retrieved online from <https://reliefweb.int/report/somalia/somalia-gu-rainy-season-2023-flash-floods-update-no-1-23-march-2023>

¹⁴ MoPIED (2023). Retrieved online from <https://mop.gov.so/flood-risk-management-infrastructure-river-embarkments/>

Fulinta Mashruuca loo qorsheeyey loona fuliyey si wax ku ool ah islamarkaana ay uga hortageen ama ay u yareeyeen khatarta fatahaadaha ee degmooyinka hawlaha laga fuliyay.

CUTUBKA 2 — NAQSHADEYNTA IYO HABRAACA BAARISTA

2.1. Ujeeddada Baarista

Ujeeddada baarista ayaa ahayd in lagu qiimeeyo in tallaabooyinka maaraynta khatarta fatahaadda ee ilaa hadda uu fuliyay Unugga Fulinta Mashruuca loo qorsheeyey loona fuliyey si wax ku ool ah islamarkaana ay uga hortageen ama ay u yareeyeen khatarta fatahaadaha ee dowlad-goboleedyada Jubbaland, Hirshabeelle iyo Koonfur-galbeed.

Ujeeddooyinka gaarka ee baaristaa waxa ay ahaayeen qiimeynta in:

1. Unuggu uu si hufan u maareyay qorsheynta iyo hirgelinta shaqooyinka dhismaha jiinka webiga si loo yareeyo khatarta fatahaadda; iyo
2. Hawlaha dayactirka jiinka webiga lagu dhammeeyay waqti munaasib ah lagana gaaray natiijadii la rabay.

2.2. Su'aalaha Baarista, Halbeegyada Qiimeynta, iyo Ilaha Xogta

Si loo qiimeeyo waxqabadka Unugga ee dayactirka jiinka webiyada, halbeegyada qiimaynta ayaa laga soo qaatay ilo kala duwan oo ay ka mid yihiin Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca (PAD), Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), Qandaraasyada Shirkadaha, iyo Qorshayaasha Hawlaha.

Shaxda 1 - Su'aalaha Baarista, Halbeegyada Qiimeynta, iyo Ilaha Xogta

Su'aalaha Baaristaa	Halbeegyada Qiimeynta	Ilaha
Su'aasha 1^{aad} ee baarista: Unugga Fulinta Mashruuca si wax ku ool ah ma u maareyay qorsheynta iyo hirgelinta shaqooyinka dhismaha jiinka webiga si loo yareeyo khatarta fatahaadda?		
Su'aal hoosaad 1.1 – Unuggu ma u qorsheysay shaqooyinka dhismaha jiinka webiga si wax ku ool ah?	Unugga Fulinta Mashruuca waa in ay cayimaan meelaha ay daadadku saameeyeen iyaga oo isticmaalaya xogta goobaha iyo sawirrada dayax-gacmeedka, sidoo kalena goobaha dhismaha ay la jaanqaadayaan kuwa uu hortebinta siiyay qorshaha horumarinta qaranka 9 iyo in ay ka qeyb qaadanayaan xaqiijinta ujeeddooyinka mashruuca ee horumarinta adkeysiga iyo yaraynta khatarta musiibada.	Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM)
Su'aal hoosaad 1.2 –Ilaa xad intee le'eg ayaa derbiyada jiinka webiga ee la dhisay ay leeyihiin tayo ku filan oo si wax-ku-ool ah uga qayb qaadanaysa xallinta baahiyaha bulshada?	Sida laga soo xigtay Hagaha Hirgelinta Mashruuca, Unugga ayaa mas'uul ka ah tayada guud iyo kormeerka habka shaqada, Kooxaha Mashruuca ee heer Gobol (KMHG) ayaa mas'uul ka ah dib u eegista, hubinta u hoggaansanaanta, iyo kormeerka shaqooyinka, halka hay'adaha DFS iyo kuwa DXDF ay mas'uul ka yihiin kormeerka goobta iyo hubinta tayada farsamada iyo in dhismayaasha jiinka webiga ay leeyihiin tayo ku habboon iyo waxtar bulsho.	Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM)
Su'aasha Baaritaanka 2 – Unugga Fulinta Mashruuca ma xaqiijiyay in dayactirka jiinka webiga lagu dhameystiray waqti ku habboon lagana gaaray u jeeddadii laga lahaa?		

<p>Su'aal hoosaad 2.1 – Hawlaha shaqo ee dayactirka jiinka webiga ma ka badbaadiyaan bulshooyinka khataraha fatahaadaha markii la dhammaystiray?</p>	<p>Sida laga soo xigtay Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), dayactirka jiinka webiga oo ka mid ah qaybta 2aad ayaa loo qorsheeyay in wax looga qabto fatahaadda mustaqbalka iyada oo loo marayo shaqooyinka yaraynta khatarta fatahaadda.</p>	<p>Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM)</p>
<p>Su'aal hoosaad 2.2 – Dhismaha jiinka webiga ma lagu dhameystiray waqtigii loo qorsheeyay?</p>	<p>Shaqooyinka dib-u-dayactirka jiinka webiga waa in lagu dhammeeyaa wakhtiga lagu heshiiyey iyadoo la raacayo heshiisyada Unuggu la saxiixday shirkadaha fulinaya hawlaha (qandaraaslayaasha).</p>	<p>Hagaha Hawlgallada Mashruuca (POM), Heshiisyada Hawlaha</p>
<p>Su'aal-hoosaad 2.3 – Jiinka webiga ee la dhisay bulshada si waarta ama uga ilaalin doonaan daadadka mustaqbalka fog?</p>	<p>Marka la eego Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), dhismaha jiinka webiga waa in loo qaabeeyaa loona dhisaa si waafaqsan Heerarka Dib-u-dhiska Wanaagsan (Build Back Better) si kor loogu qaado u-diyaargarowga khataraha fatahaadaha mustaqbalka.</p>	<p>Dokumentiga Qiimeeynta Mashruuca</p>

Xigasho: Xog ururinta kooxda baarista waxqabadka ee XHGS (Nofeembar 2023).

2.3. Baaxadda iyo Xadiddaadda Baarista

Hay'adda ugu weyn ee la baaray waxa ay ahayd Unugga Fulinta Mashruuca oo hoos yimaada Wasaaradda Maaliyadda, oo mas'uul ka ah hubinta in hawlaha dib-u-dayactirka jiinka webiga u hirgaleen si wax-ku-ool ah oo hufan. Baarista ayaa diirada lagu saaray dib u dayactirka lagu sameynayo jiinka webiga ee degmooyinka ay fatahaaduhu saameeyeen ee dowlad goboleedyada Hirshabeelle, Koonfur-galbeed iyo Jubbaland.

Baarista waxaa lagu eegay diiwaanka maaliyadeed iyo hawlaha la qabtay muddo ka badan afar sano, laga bilaabo 2020 ilaa 2023. Muddadan waxaa loo xushay maadaama mashruucuu bilaabmay Maajo 2020, taas oo u ogolaanaysa in dib u eegis dhamaystiran lagu sameeyo waxqabadka iyo waxtarka mashruuca ee muddadaas. Si kastaba ha ahaatee, walaaca amniga awgiis, kooxda hantidhowrku waxa ay caqabado kala kulmeen gaaritaanka goobaha fog-fog, waqtina kuma qaadan karin goobaha ay tageen.

2.4. Hababka Xog Ururinta

A. Dib-u-eegista dokumentiyada

Kooxda baaristu waxay dib u eegis ku sameeyeen dokumentiyo khuseeya qorshaynta iyo hirgelinta hawlaha dib-u-dayactirka jiinka webiga. Intaa waxaa dheer, dokumentiyada naqshadeynta ayaa la baaray si loo ogaado inay dhammaystiran yihiin, kuna filan yihiin in loo isticmaali karo in lagu hago hirgelinta shaqooyinka dhismaha jiinka webiga.

Liis faahfaahsan oo ah dokumentiyada iyo galalka aanu dib u eegnay ayaa lagu soo bandhigay shaxda 3 ee **Lifaaqa II**.

B. Wareysiyo

Kooxda hantidhowrka ayaa wareystay ka faa'iideystayaasha dhismaha jiinka webiga ee lagu hirgeliyay mashruuca MKXS. Kooxdu waxa kale oo ay waraysiyo la yeelatay shaqaalaha muhiimka ah ee mashruuca oo ay ku jiraan injineerada goobta, injineerada mashruuca, khabiirada Dabagalka iyo Qiimaynta (M&E), iyo Isku Duwaha Mashruuca. Tan waxaa loo sameeyay si loo helo caddayn, xaqiijin, iyo sharraxaadyo ku saabsan arrimaha aan ku soo aragnay dukumentiyada. Wareysiyada ayaa sidoo kale lagu qiimeeyay saamaynta uu mashruuca ku yeehsay bulshooyinka, baaxadda wadashaqeynta iyo ka-qaybgelinta ka-faa'iideystayaasha ee qorsheynta iyo hirgelinta hawlaha dhismaha jiinka webiga.

Ka eeg Shaxda 4 ee **Lifaaqa II** liiska faahfaahsan ee shakhsiyaadka la waraystay.

C. Booqashada Goobaha

Kooxda hantidhowrku waxay booqdeen oo ay kormeer ku sameeyeen 24-ka goobood ee laga dhisayay jiinka webiga si ay u xaqiijiyaan jiritaankooda iyo in ay u kuur-galaan tayada shaqo si waafaqsan qodobbada heshiiska ee lala saxiixday shirkadaha. Kooxda hantidhowrku waxaa la socday injineero ka socday Unugga Fulinta Mashruuca intii lagu jiray dhammaan booqashooyinka goobaha. Faahfaahinta goobaha la booqday waxay ku yaallaan Shaxda 5 ee lagu soo bandhigay **Lifaaqa III**.

Goobaha la booqday waxaa lagu doortay iyadoo la isticmaalayo habka doorashada ula kaca ah. Kooxda hantidhowrku waxay xusheen 24 goobood oo ka mid ah 129 goobood oo mashruuca laga hirgeliyey ee Soomaaliya. Waxaa la tixgeliyay juquraafi ahaan goobtu meesha ay ku taal, saamaynta daadadka, sahalka lagu gaari karo, qoondada miisaaniyada magaalo kasta, iyo amniga. Ujeeddadu waxay ahayd in sedaxda dawlad goboleed ee mashruuca laga hirgeliyay loo qiimeeyo si dheelli tiran. 24-ka goobood ee la soo xulay ayaa ahaa goobo fatahaaduhu ku soo noqnoqdeen oo ku yaal saddex dowlad goboleed oo kala ah Hirshabeelle, Jubbaland iyo Koonfur-galbeed. Sababta ugu weyn ee loo xushay goobahan waxay ahayd in la qiimeeyo sida dib-u-dayactirka jiinka webigu uga qayb qaataan yaraynta khatarta fatahaadda iyo kor u qaadida adkeysiga bulshada. Intaa waxaa dheer, ujeeddadu waxay ahayd in la soo dul istaago xaaladaha ay ku suganyihiin goobaha iyo haddii kaabayaashaas ay yihiin kuwo gaarsiisan heerkii lagu heshiiyay.

Magaalooyinka la soo xulay (Beledweyn, Doolow, iyo Afgooye) ee saddexdan dowlad goboleed ayaa marka la isku daro waxay ka kooban yihiin boqolkiiba konton iyo lix (56%) wadarta guud ee miisaaniyada loo qoondeeyay jiinka webiga iyo boqolkiiba siddeed iyo toban (18%) tirada guud ee goobaha mashruuca. Faahfaahinta habka xulashada goobaha la doortay waxa lagu muujiyay shaxda 2, oo lagu soo bandhigay **Lifaaqa I**.

2.5. Heerarka Baarista

Baarista waxaa loo sameeyay si waafaqsan Halbeegyaka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Guud (ISSAI 3000), ee khuseeya barista waxqabadka.

Si loo waafaqo heerkani caalimiga ah, waa in barista loo qorsheeyaaa loona hirgeliyaa si loo helo caddaymo dhemystiran oo ku habboon, kuwaas oo saldhig maangal ah u noqon kara natiijooyinka iyo gunaanadyada iyada oo la fiirinayo ujeedooyinka barista.

CHAPTER 3 — FAAHFAAHINTA MAJAALKA BAARISTA

3.1. Baahida loo Qabo Kaabayaal Xooggan oo lagu Maareeyo Khataraha Fatahaadaha

Fatahaadaha webiyada ayaa ah masiibooyinka dabiiciga ah ee ka dhaca aagga webiyada Jubba iyo Shabeelle ee Koonfurta Soomaaliya, halka gobollada waqooyi ay ka dhacaan daadad ay sababaan roobabka. Labada fatahaadood ayaa sababa khasaaro nafeed iyo mid dhaqaale oo aad u sarreeya. Marka tirada dadku sii badato, magaalooyinkuna ay ku fidaan dooxooyinka fatahaaduhu ka dhacaan, waxaa si aad ah u sara kacaya khasaaraha nafeed iyo midka hantida soo gaara.

Mashruuca MKXS waa dadaal dowladeed oo uu maalgelinayo Bankiga Addunka kaas oo taageera ka soo kabashada fatahaadaha iyadoo la bixinayo taageero degdeg ah iyo dayactirka kaabayaasha ku yaal dowlad goboleedyada Hirshabeelle, Koonfur Galbeed, iyo Jubbaland ee Soomaaliya. Ujeeddada mashruucan waa in la taageero dib u soo kabashada hab-nololeedyada iyo kaabayaasha goobaha daadadka iyo abaaruhu saameeyeen iyo xoojinta awoodda u diyaar-garowga masiibooyinka dalka oo dhan. Si wax looga qabto daadadka mustaqbalka, mashruuca, qeybtiisa 2(c), ayaa hirgeliyay hawlaha yaraynta khatarta fatahaadda, oo ay ku jiraan ilaalinta jiinka webiga, dhiraaynta jiinka webiyada iyo dayactirka jiinka webiga; dib u soo celinta nidaamka maareynta qulqulka biyaha roobka; iyo ka saaridda dhoobada si loo soo celiyo marinnada asalka ah ee webiyada ee dhoobadu buuxisay.

3.2. Hannaanka Sharciga

Mashruuca waxaa fulinaya Unugga Fulinta Mashruuca ee Wasaaradda Maaliyadda ee federaalka, oo waajibaadkeeda ka soo dhiraandhirineysa Heshiiska Maalgelinta ee u dhexeeya DFS iyo Bankiga Adduunka, Dokumentiga Qiimeynta Mashruuca, iyo Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM). Waxa intaa dheer in, shaqada mashruuca oo ay fuliyaan la-hawlgalayaasha waxaa haga heshiisyada qandaraasyada ee u dhexeeya Unugga iyo la-hawlgalayaasha.

3.3. Maalgelinta

Shaxda 6A ayaa qeexaysa miisaaniyada dib loo eegay iyo kharashyada dhabta (USD) ee qaybaha kala duwan ee mashruuca. Shaxda 6B ee hoose waxay muujinaysaa qoondaynta miisaaniyada mashruuca ee kaabayaasha maaraynta khatarta fatahaada.

Shaxda 6A — Qoondiynta Maalgelinta ee Qeybaha Mashruuca

Qeybta/Qeybaha	Miisaaniyadda Dib loo eegay(USD)	Kharashka Dhabta ee la bixiyay(USD) ¹⁵
Qaybta 1 - Adeegyada aasaasiga ah ee degdegga ah iyo taageerada hab-nololeedka	30,000,000.00	23,047,403.00
Qaybta 2 –Ka soo kabashada daadadka muddada dhexe	41,000,000.00	11,576,507.14
Qaybta 3 –U Diyaargarowga khatarta ka dhasha musiibada ee muddada-dheer	37,755,679.00	11,256,374.00
Qaybta 4 - Maareynta Mashruuca	17,000,000.00	8,982,491.99
Qeybta 5 –Ka jawaab celinta xaaladaha deg dega	16,744,321.00	16,744,321.74
Qeybta 6 –Taageerada soo kabashada iyo wax ka qabashada sugnaan la'aanta cunnada	45,000,000.00	24,110,840.00
Wadar	187,500,000.00	95,717,937.87

Shaqooyinka dib-u-dayactirka jiinka webiyada waxaa ka mid ah ilaalinta daanta webiga, dib u soo celinta nidaamka maareynta qulqulka biyaha roobka, dayactirka marinada waraabka webiga, iyo ka saaridda dhoobada si loo soo celiyo marinada asalka ah ee webiyada ee dhoobadu buuxisay oo hoos taga 2(c). Faahfaahinta waxa lagu muujiyay shaxda 6B:

Shaxda 6B - Qoondiynta Miisaaniyadda ee Kaabayaasha Maareynta Khatarta Fatahaadda

Qaybta 2 – Ka soo kabashada daadka muddada dhexe	Miisaaniyadda Dib loo eegay (USD)	Kharashka Dhabta ee la bixiyay (USD) ¹⁶
Dib-u-habaynta Khayraadka Biyaha iyo Kaabayaasha Maareynta Khatarta Fatahaadaha	12,600,000.00	6,015,495.40
Kaalmada Farsamo (Naqshada iyo Kormeerka, Tayada dhowrka, Ilaalinta Deegaanka iyo Bulshada, iwm.) –Xafiiska Qaramada Midoobay ee Mashaariicda(UNOPS)	1,045,454.00	1,045,454.00
Wadar	\$13,645,454.00	7,060,949.40

Xigasho: Bayaanada Dhaqaalaha ee Unugga Fulinta Mashruuca

¹⁵ Tani waa kharashka dhabta ah ee laga bixiyaya miisaaniyada mashruuca illaa Ogosto 28, 2023.

¹⁶ Tani waa kharashka dhabta ah ee laga bixiyaya miisaaniyada mashruuca illaa Ogosto, 2023.

3.4. Dowlada iyo Mas'uuliyadaha Hay'adaha Muhiimka ah ee ku lug leh Mashruuca


Shaxda hoose waxay muujinaysaa dowlada iyo mas'uuliyadaha hay'adaha muhiimka ah ee ku lug leh mashruuca.

Shaxda 7—Dowlada iyo Mas'uuliyadaha Hay'adaha Muhiimka ah ee ku lug leh Mashruuca

Hay'adda	Dowlada iyo Mas'uuliyadda
Unugga Fulinta Mashruuca	Isku-dubbaridka habka hortobin siinta iyo kala horreysiinta hawlaha, qorsheynta maalgashiga, kormeerka tayada iyo habka, soo iibinta badeecadaha iyo adeegyada, raadinta diidmo-la'aanta iyo ansixinta Bankiga Adduunka, kormeerka habka maamulka qandaraasyada, iyo maareynta maaliyadda iyo warbixinnada.
Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha (WWW)	Cayimidda mashruuc-hoosaadka hoos yimaada qorshayaasha maalgashiga, diyaarinta naqshadaha mashruuc-hoosaadka, diyaarinta dukumeentiyada tartanka mashruuca, iyo kormeerida la-taliyayaasha.
Kooxaha Mashruuca ee heer gobol	Hirgelinta la-tashiyada bulshada heer degmo, dib-u-eegis, u hoggaansanaan, iyo kormeerka iyo la socodka shaqada.
Guddiga Hagidda Mashruuca	Dib u eegidda iyo ansixinta qorshooyinka maalgashiga heer gobol, naqshadaynta waxqabadka qaybaha, iyo qorshaha iibka. Bixinta go'aan-qaadasho istiraatiijiyadeed, iyo hagitaan siyaasadeed, iyo la xiriiridda hay'adaha fulinta sharciga si loo sugo amniga mashruuca.

Hay'adaha DXDF ayaa mas'uul ka ah hirgelinta dadaallada soo kabashada muddada-dhexe iyo dib-u-habaynta kaabayaasha maareynta khatarta fatahaadda. Waxay cayimaan hawlaha mashruuc-hoosaadyada, diyaarinta naqshada, kormeerka qandaraaslayaasha, waxayna la shaqeeyaan hay'adaha kale si looga helo taageero. La taliyayaal gaar ah, qandaraaslayaal, iyo ururada bulshada rayidka ah ayaa sidoo kale ku lug leh hirgelinta mashruuc-hoosaadyada.

Intaa waxaa dheer, Mashruucu wuxuu ujeedkiisu ahaa in la wanaajiyo isku xirnaanta ka dhexeysa hay'adaha dawladda ee heer gobol iyo heer federaal iyo bulshooyinka ay fatahaaduhu saameeyeen si dib loogu dhiso kalsoonida lagu qabo dawladda loona xoojiyo xiriirka ka dhexeeya maamulka dowladda iyo muwaadiniinta. Mashruucu waxa uu kor u qaadaa iskaashiga ka dhexeeya heerarka kala duwan ee dawladda iyo bulshooyinka, taas oo lagama maarmaan u ah maaraynta khataraha iman kara iyo kor u qaadida kalsoonida ka dhaxaysa muwaaddinka iyo dawlada. Qaabka hirgelinta ee hay'adaha - oo la sameeyay iyadoo lala tashanayo DFS iyo Dowlad Goboleedka - ayaa lagu muujiyay sawirka 1.



1. Guddiga Hagidda Mashruuca – XRW (Guddoon), WQMHD, WM, DXDF -----
Dowladaha Xubaha ka ah Dowladda Federaalka
2. Unugga Fulinta Mashruuca heer Federaal
 - Sii wedidda/xoojinta SSF LD PIU-da jira ee ay maamusho WM si ay si guud ugu maareeyaan mashruuca.
 - Taageero cayiman oo dheeraad ah oo ka timaada WQMHD (Isku duwid, qorsheyn, xiriirin, iyo Q&D)
3. Taageerada Maamulka Mashruuca
4. WWW farsamo ee DFS; Waxbarashada; Biyaha; Caafimaadka; Gaadiidka; Beeraha; MOHADM; IWM
5. Kooxaha Mashruuca ee heer DXDF
6. Xiriirka Bulshada
 - Qorsheynta mashruuc hoosaadyada, naqshadeynta iyo hirgelinta
7. U qeybsanayaasha mashruuca ee DXDF
8. Qandaraaslayaasha/Ururada Bulshada/Bahwadaagta
9. Hirgelinta MKXS

3.5. Faahfaahinta Geeddi-Socodka Hawlaha

Nidaamyada iyo geeddi-socodka hawlaha dib-u-habaynta jiinka webiga ayaa lagu muujiyay sawirka hoose:

- 1 Cayimidda Goobta

Sawirrada dayax-gacmeedka ayaa la darsayaa si loo ogaado meelaha uu webigu ka iabsadayee la dayactiri karo.
- 2 Qiimaynta Sahalka lagu Gaari Karo Goobta

Marin-u-helidda goobta oo laga qiimeyay dhinacyada amniga, gaaritaanka, fogaanta
- 3 Qiimaynta Saameynta Mashruuca ee Bulshada iyo Deegaanka

Qiimaynta khataraha iyo saameynta deegaanka iyo bulshada iyo dejinta shuruudaha wax ka qabashada/yareynta khatarahaas.
- 4 Ku-deeqidda/Oggolaanshaha Dhulka

Ku-deeqidda/oggolaanshaha dhulka laga dhisayo jiinka webiga
- 5 Diyaarinta iyo Dib-u-eegista Nashqadaynta

Diyaarinta naqshadaha ee FAO (u xilsaaran naqshadeynta iyo kormeerka) si waafaqsan Heerarka Dib u dhiska Wanaagsan, dib u eegista iyo oggolaanshaha naqshadaha ee dowladda.
- 6 libka iyo Qandaraas Bixinta

libinta, qandaraas bixinta iyo bilawga hawlaha dayactirka jiinka webiga

Sawir: Hannaanka hawlaha dhismaha jiinka webiga

Xigasho: Kooxda Baarista ee Xafiiska Hantidhowrka Guud

CUTUBKA 4 — NATIJOOYINKA, GUNAANADKA, IYO TALOONYINKA

4.1. Daldaloollo ka jira Dayactirka Jiinka Webiga

Sida ku cad Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), Unugga Fulinta Mashruucu, waa in ay sameeyaan qiimeyn baahiyaha bulshada iyo hannaanka ka qaybgalka taas oo aasaas ay u yihiin macluumaadka iyo talooyinka Qiimeynta Baahiyaha ka dhashay Saameynta Fatahaadda (QBSF) oo ah isha ugu weyn ee lagu ogaanayo baahiyaha bulshooyinka ay saameeyeen fatahaadaha soo noqnoqda ee Soomaaliya, sidoo kalena, Unuggu uu isticmaalo wadiiqo si wanaagan loo qeexay oo ka jawaabaysa rabitaanka bulshada marka la xulanayo lana hirgelinayo hawlo wax ka taraya baahiyaha deg degga ee bulshooyinka.

Booqashada goobaha ayaa waxaan ku ogaanay cillado ka jira dhismaha jiinka webiga ee Dhagaxtuur 2 iyo Baalgorey ee degmada Afgooye. Dhagaxtuur 2, derbiga gabbaadka (gabion walls) waxay lahaayeen daldaloolo sababtoo ah bulshada ayaa diiday in qaybo ka mid ah derbiga uu ku fido dhul beereedkooda. Baalgorey, dhismaha derbiga waxaa ka muuqday meelo bannaan oo loo dhaafay marinka doomaha.

Xirmada Sawirka 1	
Gaabis ka muuqda dhammaadka derbiga, Dhagahtur 2 ee Afgooye	Gaabis ka muuqda dhammaadka derbiga, Baalgorey ee Afgooye
	

Xigasho: Kooxda Hantidhowrka ee goobta booqatay 14kaJannaayo 2024.

Kooxda hantidhowrku waxa ay sidoo kale soo arkeen daldaloolo ka jirta goobaha ku yaal Qansaxley, halkaas oo uu Injineerka goobtu ka warbixiyey daldaloolo qiyaastii dhan 800 mitir inuu u dhexeeyo goobaha. Intaa waxa dheer, intii ay ku guda jireen kormeerkooda shaqo, kooxda hantidhowrku waxay soo ogaadeen daldaloolo ka jira goobaha Qase 1, Qase 2, Qase 3, Sulguduud/Nasteh, Sulguduud 1, Sulguduud 2, Sulguduud 3, iyo Sulguduud Cabdirashiid ee Doolow. Daldalooladan waxaa loo aaneynayaa wacyigelin la'aanta iyo ka qeyb gal la'aanta bulshada, kuwaas oo dhiirigelin lahaa in la iska kaashado fidinta derbiyada si ay fatahaada uga babaadiyaan daka, mashruucuna u noqdo ku waxtar leh.

Sidoo kale, kooxda hantidhowrku waxay soo arkeen daldaloolo ka jirta cirifyada Siigalow/Yuusuf A iyo Hawatako 4 ee Beledweyn. Meelahan bannaan ayaa sahlay in daadadku ka soo gudbaan, ayna saameeyaan dhul beereedka iyo degaannada ku xeeran.

Xirmada Sawirka 2:

Sigaalow – Yuusuf A, Goob ku taal Beledweyn: Daldalool ka jira cirifka darbiga



Hawatako 4 oo ku taal Beledweyn: Daldaloolka jira cirifka darbiga



Xigasho: Kooxda baarista ee goobta booqatay, Jannaayo 2024

Imaraat 2 oo ku taal degmada Afgooye, waxaan ku soo argnay darbi aan dhameystirneyn oo uu qandaraasluhu uusan gaarsiin dhererkii loo baahnaa. Taa baddalkeeda, qandaraasluhu wuxuu isticmaalay jawaanno ciid ah si uu u buuxiyo daldalool soo baxay ka dib markii milkiilayaasha beerta codsadeen derbi gaar ah. Sida laga soo xigtay injineerka Unugga Fulinta Mashruuca, daldaloolka goobtaan waxaa sababay beeraleyda aagga oo ay adkaatay in oggolaansho laga helo. Sidaa darteed, derbigaan dhamaystirnayn wuxuu wax u dhimay wixtarkii daad celiyaha, taas oo keentay in biyuhu ay dusaan iyaga oo sababaya carro-guur derbiga gadaashiisa. Intaa waxaa dheer, dhismaha rugta waraabka oo loogu talagalay in beeralayda loo fududeeyo helitaanka biyaha webiga ayaa sababtay in biyuhu ka tan bataan xilli roobaadkii la soo dhaafay. Arrintan ayaa horseedday qanacsanaan la'aanta milkiilayaasha beeraha, taas oo keentay in ay xiraan marinka biyaha iyaga oo isticmaalaya shub.

Xirmada Sawirka 3:

Jawaanno ciid ah ayaa la isticmaalay si loo buuxiyo dhammaadka dardarbiga Imaraat 2 ee Afgooye



Dhul beeraadbiyihii fariistay ay baabi'iyeen geed miroodyadii oo ku yaal Kuweyt 1, Afgooye



Xigasho: Kooxda Hantidhowrka ee goobta booqatay, 17kii Jannaayo 2024

Gunaanad

Waxa la sameeyay hawlo bulshada looga qeyb geliyo mashruuca, si kastaba ha ahaatee, daldaloolada ka jira carra-tuurka iyo darbiyada gabbaadka daadka ayaa waxaa sabab u ahaa arrimo aan la xallin oo la xiriira in bulshada lagu qancin waayo in ay dhul bixiyaan, taas oo keentay in si waxku ool ah looga gaashaaman waayo daadadka. Sidaa darteed, waxtarka jiinka ee goobahan si weyn ayay u wiiqmeen.

Talooyin

Waxaan ku talinaynaa in Unugga Fulinta Mashruuca uu wax ka qabto gaabisiyada, oo ay mudnaan sare siiyaan ka qaybgalka bulshada si dhamaystiran, isagoo tixgelinaya baahiyaha bulshada iyo tabashooyinkooda iyo sidoo kale talooyinka ka soo baxay qiimeynta ay goobta ka sameeyeen injineeradu.

Jawaabta Maamulka

Farqigan ka jira dhamaadka gidaarka ee (Sigalow/Yuusuf A) ayaa la ogaaday intii lagu jiray qiimeynta, laakiin milkiilaha dhulka ayaa diiday inuu ku deeqo dhulka si looga dhiso darbiyada gabbaadka daadka. Iyada oo laga fogaanayo culeysyo bulsho, qaybtaas laguma darin goobaha loo xushay dib u dayactirka. Intaa waxa dheer, siyaasadda ilaalinta ee Bankigu ma ogola in la isticmaalo xoog si dhul loo helo. Goobtan (Xaarwo Taako 4), dhanka webiga waa looga sameeyay xayndaab, balse dhul-beereed ku xiga oo aan dib loo dayactirin ayaa ka qayb qaatay fatahaadda. Milkiilaha oo la wareystay intii lagu guda jiray howsha baaritaanka ayaa xaqiijisay in darbiyaga gabbaadka daadka ee laga dhisay beerteeda ay si hufan uga hortageen fatahaadda webiga. Darbiga [Imarat 2] ayaa si buuxda loo dhisay. Si kastaba ha ahaatee, milkiilaha beerta ayaa diiday xiritaanka daloolka, wuxuuna tilmaamay inuu isticmaali doono jawaannada ciidda si uu wax uga qabto haddii loo baahdo. Intaa waxaa dheer, mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee Afgooye ayaa ahaa helitaanka oggolaanshaha beeralayda. Qaar ayaa diiday in ay dhul ku deeqaan, halka qaar kalena ay si bareer ah u waxyeleeyeen darbiyada.

Unugga Fulinta Mashruuca wuxuu goobaha mashruuca ka hirgeliyay tallaabooyin looga qeyb gelinayo bulshada si loo hubiyo in bulshadu fahanto muhiimada dadaallada ka hortagga fatahaadaha. Tallaabooyinkan ayaa ujeedooda ahayd in bulshada lagu abuuro dareen lahaansho, laguna baraarujiyo doorkooda ilaalinta goobaha la dayactiray. Si kastaba ha ahaatee, bartilmaameedku wuxuu ahaa in la dayactiro jiinka webiyada ee daciifka ah iyo kuwa burburay ee SWALIM cayintay.

4.2. Darbiyada oo aan lahayn biya mareeno

Marka la eego Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), qaybta Dib-u-habaynta Kheyraadka Biyaha iyo Kaabayaasha Maareynta Khatarta Fatahaadda waa in ay wax ka qabtaan fatahaadda mustaqbalka iyadoo loo marayo shaqooyinka yaraynta khatarta fatahaadda, oo ay ku jiraan: (i) ilaalinta daanta webiga, dhiraynta jiinka webiga, iyo dayactirka jiinka webiga ee meelaha fatahaaduhu ku badanyihiin; (ii) dib u soo celinta marinada qulqulka biyaha roobka; (iii) iyo dayactirka marinnada waraabka webiga ee hore u jiray kuwaas oo door muhiim ah ka ciyaara maaraynta khatarta fatahaadda; iyo (iv) nadiifinta marinnada biyaha ee webiga si loo soo celiyo biya mareenadii asalka ahaa ee ciiddu fariisatay.

Intii aan ku guda jirnay booqashada, waxaan ku aragnay in goobaha Kuweyt 1 iyo Aytiro 1 ee degmada Afgooye ay ka maqan yihiin biyo-mareenno ama meel ay ka galaan/baxaan biyaha. Biyo-mareen la'aantan ayaa muujinaysa in arrin muhiim ah laga ilduufay waqtigii qorshaynta la waday.

Maareynta qulqulka biyaha oo aan hagaagsanayn, taasoo ay ugu wacan tahay la'aanta qorshayn sax ah iyo hirgelinta nidaamka biyamareennada ayaa sababay dhowr arrimood. Biyaha roobka ayaa ku istaaga dhul-beereedka, taasoo keenta in biyuhu ay saameeyaan aasaaska gidaarka, ka dibna ay ka dusaan darbiga. Intaa waxaa dheer, beeralaydu waxay bilaabeen in ay dalooliyaanoo ay waxyeleeyaan derbiga, taas oo laga yaabo inay waxyeleeyso waxtarka darbiyada la dhisay. Dhismayaashan waxaa loogu talagalay in ay biyaha xannibani socdaan si looga hortago in dhul-beereedku isu beddelo biya-fariisi, iyo in geed miroodyada laga ilaaliyo waxyeello.

Xirmada Sawirka 4:

Goobta Kuweyt 1: Qof beeraley ah oo isku deyaya inuu dalooliyo carro-tuur ay biyuhu u socdaan



Biyihii roobka oo ku xannibmay dhul beereed ku yaal Aytiro 1 ee Afgoye



Xigasho: Kooxda Hantidhowrka ee goobta booqatay 14kii, Jannaayo 2024

Gunaanad

Habka ilaalinta jiinka webiga ee degmada Afgooye, sida lagu arkay goobaha Kuweyt 1 iyo Aytiro 1, ayaa keentay cawaaqib xumo ka dhalatay inaan la sameyn habab biyo-mareeno oo ay sabab u ahayd qorshe xumo. Gaabisyadani waxay si weyn u yaraynayaan waxtarka tallaabooyinka yaraynta khatarta daadadka ee la fuliyay.

Talooyin

Waxaan ku talinaynaa in Unugga Fulinta Mashruucu uu dib u eegis dhamaystiran ku sameeyo qorshaynta iyo hababka dhismaha ee hawlaha ilaalinta daanta webiga. Dib-u-eegistani waa inay keentaa in mashaariicda hadda iyo kuwa mustaqbalkaba lagu daro hababka biyo-mareenka aasaasiga ah si loo wanaajiyo maareynta biyaha loona ilaaliyo waxtarka kaabayaasha la dhisay.

Jawaabta Maamulka

Iyadoo la eegayo casharkii laga bartay daadadkii El Niño ee dhowaan dhacay, Unuggu wuxuu ka fikirayaa dhismaha biyo-mareennada si arrintan wax looga qabto.

4.3. Tayada Hawlaha Shaqo oo Hooseysa

Sida ku cad Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), Unugga Fulinta Mashruucu wuxuu mas'uul ka yahay tayadhowrka guud iyo kormeerka geeddi-socodka, Kooxaha Mashruuca ee heer gobol ayaa mas'uul ka ah dib u eegista, hubinta u hoggaansanaanta, iyo kormeerka shaqooyinka, halka Wasaaradaha, hay'adaha iyo wakaaladaha DFS iyo DG ay mas'uul ka yihiin kormeerka goobta iyo hubinta tayada farsamada si loo xaqiijiyo in jiinka webiga loo dhisay heerar ku habboon macnana u leh bulshada ka-faa'iideystayaasha. Kuwaas waxaa ka mid ah heerarka injineernimada, badqabka, sida lagu qeexay Faahfaahinta Shuruudaha, sifooyinka ku qeexan qandaraasyada, iyo waafajinta baahiyaha bulshada.

Waxaan qiimeynay sida Unuggu u fuliyay hawlaha dhismaha ee qorshaysnaa si ay u dhamaystiraan hawlaha dib-u-dayactirka jiinka webiga iyada oo la eegayo tayadooda iyo sida looga faa'iideystay. Kormeerka aan ku tagnay Xawatako – Buundada Kawaanka ee magaalada Baladweyne ayaa iftiimiyay cillado la taaban karo oo la xiriira tayada oo kala ah: darbiyo aan la dhisin, dib u buuxinta aasaaska derbiyada burburay, maqnaanshaha dhagxaanta carro-tuurka , iyo jiinka webiga oo dumay ama burburay.

Xirmada Sawirka 5: Tusaale jiinka webiga oo cilladeysan, goobta Hawatako – Kawanka ee magaalada Beledweyne

Jiinka webiga ee Hawatako – Kawanka ayaa gabi ahaanba dumay, taas oo sababtay in geedo iyo qaybo ka mid ah guri ay ku dhacaan wabiga.



Raadka dhagxaanta carro-tuurka oo intooda badan webiga ku dhacay ayaa muuqda.



Xigasho: Kooxda Hantidhowrka ee goobta booqatay, 18kii Jannaayo 2024

Waxa aan ku aragnay cilad weyn derbiga gabbaadka ee laga dhisay Baalgorey 2 ee degmada Afgooye. Dhagaxda waxaa loo xiriiriyay qaab tayadeedu hooseyso, iyaga oo darfaha ka jajaban kana dabacsan, Shabakadda siligga ah ee isku-xirta dhagxaanta, ayaa tayadoodu liidataa, iyada oo qaybo ka mid ah ay googo'een, isla markaana aanay si fiican isu haysan. Tani waxay saameyn doontaa sii jiritaanka darbiga maadaama qaybo ka mid ah dhagaxyada iyo siliggu ay kala go'ayaan.

Intaa waxaa dheer, derbiga la dhisay, ee loogu talagalay ka-hortagga daadadka, ma laha dhismaha janjeerka dhinaca webiga, taas oo muhiim u ah qulqulka biyaha iyo ka hortagga aruurka qashinka, dhagaxda iyo ciidda. Kormeerka goobta ayaan ku soo ogaanay in laga leexday naqshadii la qorsheeyay. Tan ayaa wax u dhimaysa waxtarka tallaabooyinka ka-hortagga daadadka, taasoo muujineysa muhiimadda gaabis weyn aa ka jira dhismaha derbiga jiinka. Halkan ka wad

Goobta Helo Keliyo-Hadoole ee degmada Baladweyne ayaa waxaan ku aragnay in qeyb 15 mitir ah oo ka mid ah dhagxaanta muhiimka u ah in lagu taageero qararka ciidda uu soo gaaray burbur iyaga oo sidoo kale booskoodii ka dhaqaaqay ka dib labo fatahaad oo is xig-xigay, Dhagaxda xiriirsan ayaa loogu talagalay in lagu ilaaliyo carra-guurka ay keenaan biyaha socda, Si kastaba ha ahaatee, xoogga sare ee biyaha dartood, dhagaxdu ma aysan qaban shaqadii loo dhisay, taas oo keentay burbur soo gaara dhismahooda, Xaaladda qaybtan waxyeelladu soo gaartay ayaa sii xumaan karta iyada oo ay suurtoagal tahay in uu burburo darbigu.

Intii aan ku guda jirnay kormeerka goobta Bilisdiid 2 ee magaalada Baladweyne, waxa aan soo ogaannay in oo keli ah qayb kamid ah jiinka Webiga la dhisay, Billowga dhismaha iyo dhammaadkaba lama dhisin, taas oo keentay in qayb weyn oo ka mid ah ay bannaan tahay. Meesha bannaan waxaa loo aaneynayaa Qandaraaslaha (Gobanle Construction & General Service Company) oo ku guuldareystay in uu ku dhammeeyo mashruuca muddadii loo qabtay, Cilladan ayaa wiiqday waxtarka jiinka Webiga ee la dhisay iyada oo aan qaban shaqadii loogu talagalay, sidoo kalena khatar ku ah bedqabka iyo ladnaanta bulshooyinka ku dhow.

Waxa aan aragnay intii aan ku guda jirnay booqashada deegaanka in aan la dhisin janjeerka Webiga ee dhanka xaafadda carro-tuurka Hawotako 4, Beledweyn ee dowlad-goboleedka Hirshabeelle, taas oo keentay in carradu bannaanaato una nuglaato carro-guur. Tan oo deegaanka u nugleyneysa khatar la xiriirta deegaanka, oo ay ku jiraan carra guurka, iyada oo waxna u dhimaysaa sugnaanta muddada dheer ee jiinka. Janjeerka carro-tuurka ee aan la dhisin waxa ay kordhisaa khatar in ciiddu dhaqaaqdo, taas oo khatar weyn ku ah waxtarka mashruuca.

Xirmada Sawirka 6:

Bilisiid 2: Daldalloolo ka banaanaa goobta oo sababay fatahaado ku soo rogmaday deegaanada ku xeeran.



Helo Keliyo – Hadole: Qayb ka mid ah dhagaxda carro-tuurka (qiyaastii 15m) ayaa jaban



Xigasho: Kooxda Baarista ee goobta booqatay, 18kii Jannaayo 2024

Markii aan booqanay Sulguduud/Nasteh, Sulguduud1, 2, 3, iyo Sulguduud/Xuseen Ibraahim, waxaan cilado ku aragnay billowgahore ee goobta, cilladahan oo ka dhashay daadad. Tani waxay muujineysaa in waxyaabaha la dayactiray aysan in badan sii waari karin. Injineerada ayaa tilmaamay in darbiyada laga sameeyay dhagaxda iyo siligga ay ka wanaagsanyihiin kuwa carrada ah, sidoo kalena ay u baahan yihiin dhul kooban.

Xirmada Sawirka 7:

Qeyb ka mid ah dhagaxda xiriirsan ayaa daad qaaday goobta Sulgudud 1 ee Dolow



Qeyb ka mid ah dhagxaanta xiriirsan ee Sulgudud ee Doolow oo uu daad qaaday.



Xigasho: Kooxda Baarista ee goobta booqatay, 23 Juun 2024

Gunaanad

Cilladaha la ogaaday, sida dhismayaasha aan dhamaystirnayn, janjeerrada carro-tuurka ee aan la dhisin, ama burburka daadadku keeneen, ayaa khataro waawayn ku ah waxtarka jiinka la dhisay ee webiga, badqabka bulshada, iyo waaridda waxtarka goobaha la dayactiray. Intaa waxaa dheer, cilladahaani waxay muujinayaan in kormeerka uu sameeyay Unugga Fulinta Mashruucu ay ahaayeen kuwo aan wax ku ool ahayn maadaama aysan xallin cilladihii jiray.

Talooyin

Waxaan ku talineynaa in Unuggu uu qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagu saxayo cilladaha lagu soo arkay goobaha iyada oo dib loo dhisayo qeybaha dumay, kuwa waxyeelladu gaartayna la dayactiro si kor loogu qaado waxtarka iyo waaritaanka jiinkala dhisay.

Jawaabta Maamulka

Diidmada beeralayda iyo bulshada in ay ku deeqaan dhul ayaa waxay keentay in la dhiso dhismo ballaciisu yar yahay. Arrintan darteed, goobtan [Hawatako - Kawanka] lama dhisin.

Fatahaadihii El Nino ayaa waxyeeleeyay goobta [Helo Keliyo – Hadoole], Unugga Fulinta Mashruucuna wuxuu qorshaynayaa in uu dib u habayn ku sameeyo goobtan iyada oo la hagaajinayo lana xoojinayo nashqadihii darbiyadii gabbaadka daadka.

Bilisdid 2 looma dhammayn ballicii iyo dhererkiisii sidii loo nashqadeeyay sababtoo ah dhul ku filan oo la waayay.

Mashruucan [Hawatako 4] looma hirgelin 100% sidii hore loo qeexay. Keliya 80% shaqada ayaa la dhammeeyay caqabado la xiriira badqabka iyo arrimaha bulshada awgeed (fadlan tixraac lifaaqa).

4.4. Dib u Dhaca Dayactirka Jiinka Webiga

Marka la eego qandaraasyada lala saxiixday adeeg bixiyayaasha, shaqooyinka dib-u-dayactirka Jiinkawebiga, waxay ahayd in lagu dhammeeyo waqtiyada lagu heshiiyey.

Dib u eegis lagu sameeyay dokumentiyada ayaa muujiyay dib u dhac ku yimid dhismaha iyo arrima la xiriira badqabka goobta Siigalow -Yuusuf ee magaalada Beledweyne. Dib u dhaca dhismaha ayaa waxaa keenay sababo la xiriira badqabka, kuwaa oo qasab ka dhigay in wax laga beddelo naqshadeynta, sababaha oo ay ka mid yihiin in aan la sameyn qiimeyn ku saabsan saameynta deegaanka iyo bulshada, la-tashiga iyo ka-qeybgalka daneeyayaasha oo laga gaabiyay, magdhow iyo dib-u-dejin aan ku filneyn dadka ay saameysay, iyo qashinka iyo burburka ka dhasha dhismaha oo aan si fiican loo maareyn. Wax ka beddelka naqshadda ayaa keenay in loo baahdo waqti iyo kharashaad iyo agab dheeri ah, taasoo saameyneysa tayada, qaab dhismeedka, iyo waxtarka dhismayaasha. Sidoo kale, waxaa dib u dhac ku yimid howlihii dib u dayactirka ee Balguri 2.

Intaa waxaa dheer, warbixinnada heerka fulinta mashruuca, ayaa tilmaamay in dib u dhac iyo hakad uu ku yimid dhismihii ka socday Dhagaxtuur ee degmada Afgooye. Dhismaha jiinkawebiga lama dhameystirin ka hor xilliga fatahaada. Fatahaadihii dhacay ayaa sidoo kale hakad sii geliyay, taasi oo keentay in bulshada ku dhaqan deegaanadaasi ay u nuglaadaan qatarta iyo dhibaata ka dhalan karta fatahaada.

Dib u eegis lagu sameeyay warbixinnada kormeerka ee ay samaysay hay'adda hubinta madaxa bannaan (Independent Verification Agency - IVA) ayaa muujiyay dib u dhac ku yimid geeddi-socodka iibka. Tusaale ahaan, qiimaynta tartanka saddex iyo labaatanka (23) shirkadood ay u galeen dib-u-dayactirka dalcadaha hareeraha webiga ee ku yaalla degmooyinka Jowhar (5), Doolow (12), Luuq (4), iyo Afgooye (2) ayaa loo gudbiyay Bankiga Adduunka si uu u ansixiyo,

balse lagama helin Bankiga oggolaansho. Taasoo keentay in Unugga Fulinta Mashruucu uu si kooban dib ugu soo bandhigo qandaraasyadan rubucii afraad ee 2022, taasoo horseeday dib u dhac ku yimaadda bilawga shaqada. Warbixinta dhammaadka hawlaha dhismo ee degmada Afgooye ayaa lagu sheegay in goob kasta ay soo martay dib u dhac ugu yaraan afar (4) bilood ah. Dib-u-dhacyadani waxa laga yaabaa inay yeeshaan saamayn xun maadaama shaqooyinka dhisidda dalcadaha hareeraha webiga ay yihiin kuwo xasaasi ah oo waqti cayiman loogu baahi badanyahay, dib-u-dhacyaduna waxay bulshooyinka ka dhigi karaan kuwo fatahaadaha u nugul.

Gunaanad

In mashruuca ku guuldarrasytay in inuu u hoggaansamo waqtiyada ku caddaa qandaraaska iyo buuxinta shuruudaha badqabka ayaa kor u qaadeysa welwelka ku saabsan waxtarkiisa iyo in laga gaaro hadafkii laga lahaa. Dib-u-dhacyadan ayaa bulshada u baylihiyay khataro fatahaado waxna u dhimay guud ahaan habsami shaqaynta dhismayaashan.

Talooyin

Waxaan ku talinaynaa, mustaqbalka, in Unugga Fulinta Mashruucu uu xoojiyo dhaqan-gelinta waqtiyada qandaraasyada ku xusan, inuu sameeyo qiimeyn ku salaysan saameynta deegaan iyo bulsho ee mashruuca ka hor inta aan wax la dhisin, inuu ka qayb geliyo daneeyayaasha inta uu socdo mashruuca, iyo in uu wanaajiyo nidaamka maaraynta khatarta ka iman kara fatahaadaha inta lagu jiro dhismaha.

Jawaabta Maamulka

Dib-u-dhacyada qaar ayaa waxaa keenay waxyaabaha soo socda: agabka lagu dhiso darbiyada dhagaxa iyo siligga ka sameysan oo dibadda laga keenayay, beeralayda oo diiday gaadiidka xamuulka qaada in ay dhulkooda maraan, roobabka oo adkeeyay gaaritaanka goobta, caqabadaha amniga, in aysan jirin siyaasadda maareynta dhulka ee qaranka ee lagu maamulayo sida lagu heli karo dhulka deegaannada webiyadu ku yaallaan ee loogu talagalay dayactirka.

LIFAAQYO

Lifaaq 1

Shaxda 2 — Xulashada Goobaha la Booqanayo iyadoo lagu Saleynayo isku dheellitirka Dowlad Goboleedyada iyo Miisaaniyadda loo Qoondeeyay

Magaalo	Miisaaniyada loo Qoondeeyay Dowlad Goboleedka (USD)			Wadar	%
	Hirshabelle	Jubaland	South-West		
Jowhar	2,659,684.58			2,659,684.58	27%
Dolow		2,152,268.98		2,152,268.98	22%
Beledweyn	2,089,279.44			2,089,279.44	21%
Afgoye			1,277,641.22	1,277,641.22	13%
Bardere		777,897.76		777,897.76	8%
Luq		551,134.58		551,134.58	6%
Kismayo		354,139.16		354,139.16	4%
Wadar	\$4,748,964.02	\$3,835,440.48	\$1,277,641.22	\$9,862,045.72	
Boqolleyda Wadarta	48%	39%	13%		

Lifaaq II

Shaxda 3 — Dokumentiyada Dib-loo-eegay iyo Ujeeddada

Dokumenti	Diiradda Dib-u-eegista
Dokumentiga Qiimeeynta Mashruuca	Si loo eego haddii shuruudaha lagu heshiiyey la tixgeliyey inta lagu guda jiray marxaladda hirgelinta mashruuca iyo gaar ahaan, in la fahmo mas'uuliyadda wasaaradda maaliyadda (Unugga Fulinta Mashruuca), Guddiga hagidda, iyo lamaamulida wasaaradda qorsheynta ee maamulka iyo kormeerka fulinta mashruuca.
Heshiiska Maalgelinta	Si loo fahmo xaaladda guud ee mashruuca, muhiimadda, ujeedooyinka, dadka ka-faa'iideystayaasha, qaybaha, silsiladda natiijooyinka, sababta uu Bankiga Adduunku ugu lug leeyahay, doorka la-hawlgalayaasha, falanqaynta farsamo ee qorshaynta mashruuca, fulinta, iyo la socodka natiijooyinka.
Hagaha Hawlgallada Mashruuca	In la qeexo habraacyada hawlgelinta iyo habraacyada la raacayo marka la fulinayo qaybaha mashruuca, oo ay ku jiraan hababka cayimidda, diyaarinta, xulashada, soo iibinta, maaraynta, iyo la socodka fulinta dhammaan hawlaha kale ee mashruuca la xiriira.
Warbixinada Horumarka	Si loo qiimeeyo in hawlihii mashruuca loo fuliyey sidii loo qorsheeyay; iyo in la qiimeeyo haddii ay jiraan caqabado ama ka leexasho qorshayaasha oo laga yaabo inay dhaliyeen khatar waxqabad.
Heshiisyada iyo Naqshadaha	Si loo qiimeeyo in ujeedooyinka mashruuca, qeexitaannada, halbeegyada, iyo natiijooyinka si cad loo qeexay lana waafajiyay baaxadda mashruuca iyo miisaaniyadda. Hantidhowruhu waxa kale oo uu ogaan karaa daldaloolo kasta, weecsanaanta, ama cilladaha ku jira qandaraasyada iyo naqshadaha kuwaas oo saamayn kara tayada, hufnaanta, waxtarka, iyo waaritaanka dhismayaasha.

Lifaaq III

Shaxda 4 — Wareysiyada la Qaaday iyo Ujeedka

Hay'ad	Shakhsiga la Wareystay	Ujeeddada Wareysiga	
Unugga Fulinta Mashruuca (Wasaaradda Maaliyadda)	Xiriiriyaha Mashruuca	Si loo helo fahamka guud ee maamulka mashruuca iyada oo laga eegayo fulinta iyo horumarka qeyb kasta.	
	Khabiirka Kormeerka Qiimeynta	iyo	Si faham looga helo hababka kormeerka iyo qiimeynta oo ay ku jiraan heerka mashruucu uu marayo, caqabadaha la soo tebiyay, iyo hababka lagu dhimo khataraha.
	Khabiirka Dhaqaalaha		Si loo helo aqoon ku saabsan sida mashruuca loo maal geliyo, qoondaynta, iyo heerka bixinta kharashaadka marxaladda markaa mashruucu marayo.
	Khabiirka Iibka		Si loo helo fahamka hababka kala duwan ee loo maro soo iibinta alaabta iyo adeegyada iyo habka loo helo aqbalaadda ama diidmo la'aanta Bankiga Adduunka.
Hey'adda Cuntada Beeraha	iyo	Injineerada Goobaha	Si loo helo fahamka hababka kala duwan ee injineernimada ee qorsheynta, jadwaleynta, iyo qiimeynta hawlaha dhismaha ee qandaraaslayaasha (sawirrada dhismaha, Qorshaha Qaddarka, faahfaahinta, iyo shuruudaha kale ee farsamo).
Kooxaha Mashruuca ee heer gobol		Injineerka Mashruuca	Si loo fahmo hababka injineernimada ee kala duwan ee ku lug leh fulinta iyo qiimeynta hawlaha dhismaha ee qandaraaslayaasha, oo ay ku jiraan sawirrada dhismaha, Qorshaha Qaddarka, faahfaahinta, iyo shuruudaha kale ee farsamo
Ka faa'iidaystay aasha		Beeraleyda	Si xog toos ah looga helo saamaynta daadadka ku yeesheen beeraha, qiimeynta waxtarka tallaabooyinka ka hortagga, cayimidda meelaha nugul, qiimeynta dadaallada soo kabashada, iyo soo aruurinta xogta maxalliga ee qaababka fatahaadaha.
		Dadka deegaanka	Si loo helo xogo faahfaahsan oo ku saabsan dhacdooyinkii daadadka ee la soo maray loona qiimeeyo waxtarka tallaabooyinka yaraynta khatarahooda, hababka bulshadu ula qabsato dhibaatooyinka, qiimaynta waxyeellooyinka, iyo hababka yareynta saameynta daadadka mustaqbalka ee ay doorbidayaan.

Lifaaq IV

Shaxda 5 — Goobaha iyo Magaalooyinka iyo Dowlad Goboleedyada ay ku Yaallaan

Dowlad Goboleed	Magaalo	Tiro	Goob
Koonfur Galbeed	Afgoye	1.	Balguri 2
		2.	Kuweyt 1
		3.	Imarat 2
		4.	Aytiro 1
		5.	Dhagahtur 2
Hirshabelle	Beledweyne	6.	Hawatako - 4 (Left)
		7.	Hawatako
		8.	Helo kaliyo to Hoodley
		9.	Helo Kaliyo/Isse Hadole
		10.	Siigaalow/Yusuf A
		11.	Bilisdiid - 2
		12.	Hawatako - Kawanka
Jubaland	Dolow	13.	Sulgudud/Mudey 1
		14.	Sulgudud/Mudey 2
		15.	Sulgudud/Mudey 3
		16.	Sulgudud/Nasteh
		17.	Sulgudud/Abdirashid
		18.	Sulgudud/Hussein
		19.	Sulgudud/Adam
		20.	Sulgudud/Ali Sharif
		21.	Qansahley
		22.	Qase 1
		23.	Qase 2
		24.	Qase 3

Xigasho: Waxaa uruuriyay kooxda kormeerka ee Xafiiska Hantidhowrka Guud (Juun 2024)



XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Muqdisho, Soomaaliya

www.oag.gov.so  |  oag@oag.gov.so